



KAMID MIYAAD TAHAY SHAQAALAHA SHARIKADAHA KU MEEL GAARKA?

GARO XAQUUQAADA

TAXANAHA

Shaqaalaha sharikadaha ku meel gaarka ah waxay hoos imanayaan sharciyada caadiga ee khuseeya dhammaan shaqaalaha kale. Sharci ahaan cidda aad u shaqeyneyso waa sharikadda ku meel gaarka ah ee shaqada kuu dirtay, uma shaqeysid kambaniga halka aad maalin walbo u shaqa tagto. Arrintani waxay dhalin kartaa jaha wareer marka aad dooneyso inaad xaquuqdaada soo dhacsato. Waxa kuu anfici doona inaad garato sharciyada ku khuseeya iyo waxa laga doonayo inaad sameyso marka aay kugu dhacdo dhibaato shaqada la xiriirta.



BADBAADIN HOR LEH LOOGU TALA GALAY SHAQAALAHA SHARIKADAH KU MEEL GAARKA AH OO DHAQAN GALAY NOVEMBER 2009

2009ka isbeddello ayaa lagu sameyey Nidaamka Shaqada Caadiga iyadoo lagu kordhiyay badbaadinno shaqaalaha ku meel gaarka dhamman ee Ontario. Ogaw tallabooyinka aad qaadi karto marka sharikadda aad u shaqeysa dhowri-waydo sharciga.

Kharash ma leh

Sharikadda ku meel gaarka ah kaama qaadi karto kharash lacageed oo ku saabsan waxa aad la saxiixato sharikaddasi, meel aay kuu dirtay inaad ka shaqeeyso, ama inay kaa caawintay qorista Resume iyo Interview. Sharikadaha soo aruuriya shaqaalaha ama kuwa loo yaqaano “headhunters” weli way kaa qaadi karaan kharash haddi aay kuu soo helaan sharikad aad si joogta ah uga shaqeeyeyso.

Sharikadaha ku meel gaarka ah waxa khasab ku ah inay tafaasiil kaa siiyaan shaqada aay kuu dirayaan

Sharikadda ku meel gaarka aad u shaqeeyso waa inay qoraal kugu siiso magacooda iyo cidda aad kala xiriiri lahayd wixi war ah. Marka aay shaqada ku dirayaan waa inay ku siyaan: magaca sharikaddooda, saacaddiba inta aad ku shaqeeyeyso, wakhtiga shaqada, tilmaamaha ku saabsan nooca shaqada iyo muddada shaqadani soconeyso (haddi la garan karo), iyo inta wakhti mushaarada lagu bixinayo iyo maalmaha lacag bixinta. Waxa khasab ah inay waxyabahan oo idil sameeyaan sida ugu dhaqsi badan. Waxa kale oo khasab ku ah inay kaaga war bixiyaan xuquuqda aad leedahay sida ku qoran nidaamka Wasaaradda Shaqada.

Lacag qaadashada oo dhamaata

Haddi aad soo shaqeysay ugu yaraan mudda seddax bilood, waxaad xaq u leedahay in war lagaa siiyo xaq aad ku leedahay war geliintaasi ku saabsan xiriirka shaqaale-nimo inuu dhamaaday. (Shaqada dhamaatay ama shaqa la'aanta mudda 13 toddobaad oo ka mid ah mudda 20ka toddobaad). Sharikadda ku meel gaarka ah ayaa qaymeeyneysa inta toddobaad aad xaq u leedahay, ama inaad qaadato waxa xaq aad ku leedahay wargelintaasi.

Lacag xaq bixin shaqo

Haddii aad sharikad ku meel gaar ah u shaqeysay mudda shan sano ama ka badan, oo aay kaa joojiyaan shaqada, waxa kale oo aad xaq u leedahay in lagu siiyo lacag xaq bixin shaqo. Lacagtaasi waxaad xaq u yeelan kartaa haddi aay sharikaddu ay shaqaale mushahar bixintooda ka badantahay \$2.5 milyan, ama aay shaqada ka joojiyeen muddo 6 bilood gudahood shaqaale dhan 50 amaba ka badan. Lacagtan xaq bixinta ee lagu siinayo waa hal toddobaad musharkaaga sannadkiiba aad shaqaysay ilaa iyo xadka ugu badan ee la'eg 26 sano.

Sharikadd ku meel gaar ah kaama joojin karto inaad heshaa shaqa joogta ah

Sharikadda ku meel gaarka ah waxay kharash gareyn kartaa lacag ganaax ah kambaniga shaqada laguugu diray haddi uu doonayo inuu toos kuu shaqaaleeyo. Kharashkan waxa kambaniga lagu dallici kara oo keliya, hadday damcaan inay ku shaqaaleyaan mudda lix bilood gudahooda laga soo billabo maalinta shaqada lagu diray. Sharikadda ku meel gaarka ah ma diidi karto inay macluumaadkaaga u gudbisno kambaniga aay shaqada kuugu dirtay.

Dembi ma aha xaquuqdaada inaad weydiisato

Sharikadaha ku meel gaarka ah waxa sharci darro ku ah inay dembi kaaga dhigaan xuquuqdaada oo aad weydiisato. Arrintani hadday dhacdo waxay noqoneysa aar goosi. Sharikadda ku meel gaarka kambaniga macaamiilka la leh (halka aad u shaqo tagto) dembi ayaa looga dhiga kara waa haddii aad damacdo inaad khasab iyo xoog ku hesho macluumaadkaaga.



Hong wuxuu mudda hal sana ka soo shaqeeyey sharikad ku meel gaar ah oo u dirtay kambani weyn oo kambutarrada ku hawlan. Wuxuu arkay kambaniga ogeysiin jaga bannaan uu soo bandhigay kuna saabsan shaqa joogta ah oo isaga khibrad ahaan ku haddoon. Waxa uu u diray resumeygiisa, laakinse waxa loo sheegay inuusan codsi u qoran Karin jagadaasi maadaama uu yahay shaqaale aay soo dirtay sharikad ku meel gaar ah. Kambanigi wuxuu Hong u sheegay in dembi looga dhigayo oo lacag la kharash gareynayo haddii aay joogta ahaan isaga u shaqaaleeyaan. Hong wuxuu kambaniga u sheegay in sharciga mar hore la beddelay. Dembi loogama dhigi karo haddi aay shaqaaleeyaan lamana kharash gareyn karo, sababtoo ah wuxuu halkaasi kasoo shaqeeyey mudda lix bilood ka badan. Kambanigi wuxuu oggolaaday inay ka qabtaan resumeega ku saabsan codsiga shaqada joogtada ah.

SHAQAALAHA SHARIKADAHU KU MEEL GAARKA AH WAXAY XAQ U LEEYIHIIN (AMA U BANNAAN) CIIDAHU DADWEYNAAH. SHARCIGA KU SAABSAN

Sanadka Cusub

Maalinta Qoyska

Jimcaha Wanaagsan

Maalinta Victoria

Maalinta Kanada

Maalinta Shaqaalaha

Mahadcelinta

Kristmas

Maalinta Boksinka

BARO XUQUUQDAADA

Sharikaddeyda ku meel gaarka waxa igu tiri shaqaalaheenna xaq uma laha ciidaha dadweynaha.

Sharciga cusub ee January 2deeda 2009 wuxuu caddeynaya in shaqaalaha ku meel gaarka ah xaq u leeyihiin ciidaha dadweynaha sida dhamman shaqaalaha kale joogtada ah. Hadda shaqaalaha sharikadaha ku meel gaarka ah waxay xaq u leeyihiin 9 ciidood dadweyne Ontario gudaheeda.

Imisaan lacag ahaan ciidaha la iigu qeymeynaya.

Ciidahaaga dadweyne waa wadarta dakhligaaga afarti toddobaad ee la soo dhaafay (ayadoo lagu darayo fasaxyada haddad lacag ahaan u qaadatay) oo loo qeybiyey 20 meel. Dadka shaqeeya wakhti buuxa waxay u tahay hal maalin oo loo lacageeyay. Kuwa shaqeeya wakhtiga dhiman waxa loogu qeymeynaya intaas wax yar. Sharikaddu hadday kuu dhiibin shaqo afarta toddobaad ee ka horreya ciidaha dadweynaha, \$0 ayuu noqonaya qeymaha laguugu lacageeyey ciidaasi.

Arrintu maxay noqoneysa haddi aan shaqa la ii dhiibin marka ciidaha dadweynaha la gaaro.

Shaqaalaha ku meel gaarka ah waxa u bannaan ciidaha dadweynaha inay lacag ahaan u qaataan. Ciidahaaga dadweyne weli waxa saldhig looga dhigaya dakhliga mushaarkaga afarti toddobaad ciidaasi ka horreysay.

Maxa dhacaya haddii aan shaqeeyo ciidaha dadweynaha.

Qoraal baad ku oggolaan kartaa laba midkood: In lagu siiyo abaal marin (1.5 x sacaddi inta aad ku shaqeyso) ayadoo weliba lagu lacagaynayo ciidaha dadweynaha, ama inaad shaqeyso mamlaha ciidaha dadweynaha ayadoo mushaar ahaan lagu siinayo inta aad maalmaha caadiga ah qaadato ka dibna aad qaadato fasax maalin kale ayadoo lagu lacageynayo maalmahii ciidaha aad shaqeyso.

Sharikadda ku meel gaarka aan u shaqeeyo waxay ii sheegtay aniga inaan ahay qof shaqaale ah oo "loo doortay inuu hawl qabto" sidaas darteed iima bannaana ciidaha dadweynaha.

Disembarti 2008 dawladda waxay gudbisay nidaam sharciyeysan kasso lagu beddelay nidaamki hore oranayey qofka loo doorto hawl inuu qabto uma bannaana ciidaha dadweynaha. Dawladda waxay sidaas u sameysay inay xaqiiqsato dhammaan dadka u shaqeeya sharikadaha ku meel gaarka inay qaataan ciidaha dadweynaha.

Maxay noqoneysa shirikadda aan u shaqeeyo haddii aay lacag I siinin ciidaha dadweynaha soo soocota.

Anaka na soo wac si aad u ogaato tallaabooyinki aad qaadi lahayd iyo sida aad u qiyaasi lahayd maalmataaga ciidaha dadweynaha oo lagu lacageeyo. Kala munaaqisho sida aan u xaqiijin karno in shaqaalaha sharikadaha ku meel gaarka ah loo lacageeyo ciidaha dadweynaha.



Caasha arji shaqa ayey u qoratay sharikad ku meel gaar ah. Ciidaha Mahadcelinta marki la soo dhaafay ayey sharikaddi weydiisay sababta ciidaha dadweynaha lacag ahaan loo siini waayey. Waxa loogu jawaabay oo loo sheegay in looga baahan yahay inay sharikadda u shaqeyso mudda seddax bilood ah inta aysan xaq u yeelanin lacageyta ciidaha dadweynaha. Waa sharci darro baa lagu yiri. Waxa keliya lagaa doonaya waa inaad shaqeyso saacadaha kalkan caadiga ah inta ka horreysa iyo inta ka dambeysa ciidaha dadweynaha si aay sharikaddu u xisaabiso maalmaha ciidaha lagu lacageynayo. Waxay la mid noqon kartaa \$0, laakin xisaabtaasi waa in la soo sameeyaa. Caasha meel bay ku qoratay tafaasiishaas aay sharikadda ka heshay, ka dib waxay la soo xiriirtay Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha si aay u heshowar bixin intaas ka sii badan oo la xiriira xuquuqdeeda. Ogaanshaha aay ogaatay inay lacag ku leedahay sharikadda, hadda waxay qaadi kartaa tallabadi arrintaasi ku habbooneyd.

IS BADBAADI

- Diiwaan ku xafidso war bixin kasto iyo saacadaha aad shaqeysay. Guriga dhigo diiwaankaasi.
- Xafidso nuqullada jeegagga aad qaadatay iyo T4-rada. Marka aad shaqada ka tegeyso qaado war Bixinta Shaqadada (ROE).
- U qor sharikaddada warqad aad ku muujineyso waxa aad rumeysan tahay inaad ku leedahay. Waxaad siisaawakhti oogu dambeys ah oo aay lacagta ku bixiyaan. Waxa dhici karta in aay qatar kugu noqoto haddi aad. Welli aad u shaqeeyso sharikaddasi.
- Wasaaradda Shaqada waxay haysaa hab xisaabeed ku caawimayo sidaad u qiyaasi lahayd ciidaha dadweynaha.
- Cabasho ka xaree Wasaaradda Shaqada dhamman lacagaha mushaar ahaan aan lagu siinin, waxaad haysataa mudda lix bilood oo aad cabashada ku xareyso marka laga soo billabo wakhtiga aad lacagta qaadan lahayd oo aay ahayd inaad cabashada xareyso.
- Annaka na soo wac si aad u ogaato waxa aad sameyn lahayd marka aad aragto sharikad inay ku xad gudubtay sharciga. Ama si qarsoodi ah nagu soo war geli.

XUQUUQDA AADANAHA IYO SHAQAALAHA SHARIKADAHA KU MEEL GAARKA

Waa wax sharci ah in sharikadaha ku meel gaarka ah inay go'aan ku gaaraan qofk aay u diri lahayeen shaqa loo baahanyahay in qabto. Hasee yeeshee saldhig loogama dhigi karo noocyada midab takoorka ku taxan qoraallada Xuquuqda Aadanaha.

Qodobbada Xuquuqda Aadanaha ee goobta shaqada ka mamnuucayo midab takoorka iyo cadaadinta oo ku saleysan ginsiyad, midab, qabiil, qof waddanka uu ka yimid, da'da, lab iyo dheddig, shahwada, curyan, guurka iyo xaaladda qoyska, diin, u dhalasho iyo dembiile laga cafiyey eed uu galay.

Waxaa sharci darra ku ah sharikadaha ku meel gaarka ah inay dadka weydiyaan SIN, bassabor, wakhtiga dhalashada ama qofka waddanka uu ka yimid inta ka horreysi marka qofka shaqada lagu yaboohayo. Qofki shaqaale ah oo maleynaya inuu la kulmay midab takoor wuxuu cabasho ka xareyn kara Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha.

Meel ku qor waxa aad ka rumeysantahay Waxa uu yahay midab takoorka. Waxay ku anfici doonta haddi aad mar un xareyneeyso cabasho.

TAAGEERO HEL

Workers' Action Centre - Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha

416-531-0778 ama www.workersactioncentre.org

Wixii tafaasiil ah ee intaas dhaafsa oo ku saabsan xuquuqdaada shaqaale ahaa ino taageero aad heshaa sida aad qorshe u sameysan lahayd.


Ministry of Labour - Wasaaradda Shaqada

Lacag La'aan wac 1-800-531-5551 ama www.labour.gov.on.ca.

Human Rights Legal Support Centre - Xarunta Sharci Taageera Xuquuqda Aadanaha

Waxaa laga heli kara qareen ku takhasusay adeegyada ku saabsan Xuquuqda Aadanaha haddii kala-sooc laguugu sameeyay.

Lacag La'aan wac 1-866-625-5179 ama www.hrlsc.on.ca



416-531-0778 | info@workersactioncentre.org
www.workersactioncentre.org

Funded by
Financée par



Citizenship and
Immigration Canada

Citoyenneté et
Immigration Canada

Canada

Tixraac: Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo. Macluumaadka warqaddan ku xusan waa kuwa guud ah. Faahfaahin intaa ka badan la xiriir Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo.